




U heeggan Iswiidhan
Caddaalad badan





Iswiidhan oo *dedaalku* midho dhaliyo, faldambina cigaab lagu mutaysto, bulshaduna ku garab istaagto markaad taageero u baahato.

Mushaharka oo lacagi kaaga soo hadho.
Qoyska iyo waqtiga firaqada oo siyaado hela.

Xisbiga Moderaterna cashuurta shaqada ayuu dhimayaa si shaqayntu u faa'iido badato

- Waxaannu 5,000 kronor oo cashuur ah bishii ka dhinnay qoyska caadiga ah ee carruurta leh - waxaanannu rabnaa inaan intaa in le'eg hoos u dhigno
- Gunnada hawlgabka oo loo xoojiyo qofka
- noloshiisa shaqo oo dhan shaqaynayay
- Siyaasad kaalmo (bidrag) oo adag iyo kaalmada oo saqaf leh – shaqayntu inay faaiido badnaato, khiyaanada iyo ku-takrifalka oo la joojiyo

Dembilayaasha waa in xabsi la dhigaa
si aad dibedda u jooji karto.

Waxaannu garab taagannahay dhibbanayaasha, joojineynaa rabshadaha gaangiska, oo cunaqabataynaynaa dhaqaalaha dambilayaasha.

- Toogashooyinka dil ayaa kala badh noqday, dambilayaasha aan muwaadiniinta Iswiidhiska ahayna waa la masaafurinayaa.
- Booliis iyo kamarado badan – cigaabo ka adag iyo joojinta fududaynta xukunka faldambiyeedyo wadareedka
- Joojinta duufsadka carruurta ee gaangiska iyo cunaqabataynta dhaqaalaha dambilayaasha
- Ragga dumarka rabshadeeya waxa loo qaban sida rabshadaha gaangiska



Shilin kasta oo *cashuur lagu takri-falaa wuxuu ka go'ayaa daryeelka, dugsiga iyo amniga.*

Daryeel aad ku kalsoonaan karto. Oo aanad sugin.

Waxaad heli doontaa daryeelka aad u baahan tahay iyo waqtiga saxda ah. Waa qayb ka mid ah heshiiska bulsho.

- Waxaanu sannad kasta kordhinnay maalgelinta samafalka - sidaas ayaanay ku sii socon doontaa.
- Daryeel bixiyeyaasha jebiya dammaanadda daryeelku waa inay bixiyaan magdhow.
- Daryeel 30 maalmood gudahood - iyo daryeel magaalo kale haddii sugitaanku aad u dheer yahay
- Shuruudaha luqadeed ee daryeelka waayeelka
- Qiimaha daryeelka ilkaha oo dadka waaweyn loo jebiyo

Dhaqaale xooggan. Shaqoyin badan.

Dhaqaale xooggan oo keliya ayaa qaadi kara daryeelka bulsho ee mustaqbalka.

- Iswiidhan waa inay toban sano gudahood lahaataa heerka nololeed ee ugu sarreeya EU
- Fursado shaqo badan ee shirkado badan - cashuur yar iyo sharciyo fudud
- Nidaam dhaqaale - maaliyad dawladeed oo xooggan iyo masuuliyad lacagta cashuurta
- Maalgalin weyn oo ah difaaca, tamar nukliyeer, kaabayaal dhaqaale, dugsi iyo daryeel

Wax qabad ayaannu muujinnaa

– waxaana jira wax badan oo la qaban karo

Awoodda Iswiidhen waa heshiiska damaanad ee bulsheed. In qofka waajibaadkiisa gutaa ogaado in bulshadu taageerayso markuu u baahdo. Laakiin heshiiska bulsheed waxa ku dhacay dildilaac. Waxaad dareemi kartaa markaad shaqo ku dhididayso ee haddana mushaharku kugu fillaan waayo, marka dambiilayaashu dadka kale ku dul nool yihiin iyo marka qof noloshiisa dhan shaqaynayay uu qalitaan caafimaad bilo dhan sugayo. Sidani caddaalad ma aha. Waana taas waxa aannu wax ka qabannay.

Iswiidhan waddo sax ah ayay ku socotaa - waxay ka muuqataa nolol maalmeedkaaga

Ilaa iyo markii xisbiga Moderaterna uu xukunka qabtay:

- Cashuur dhimitaan – qoyska carruurta leh waxa laga dhimay SEK 5,000 oo dheeraad ah bishiiba
- Lammaanaha hawlgabka ah waxa laga dhimay SEK 2,200 oo dheeraad ah bishiiba
- Gaangistarrada aan muwaadiniinta Iswiidhishka ahayn oo la masaafuriyo.
- Dilalka toogashooyin oo kalabadh hoos u dhacay iyo boolis badan oo shaqo dibadeed ku jira.
- Dhimitaanka cashuurta cuntada, korontada, shidaalka iyo ISK
- Sugitaanka daryeelka caafimaad oo 30% yaraaday (marka laga reebo Stockholm, oo xisbiga S maamulo)
- Hirginnay shuruudaha luqadeed ee daryeelka waayeeelka
- Iswiidhan oo xubin buuxda ka ah NATO

Hawshayadu may dhammaan

Hadafka xisbiga Moderaterna waa in toban sano gudahood heerka nolosha ee Iswiidhan uu noqdo ka ugu sarreeya EU:da - dal dedaalku uu midho dhaliyo, rabshadaha gaangiska la tirtiro oo dugsi iyo daryeel caafimaad shaqeeyaan.

Ma rabtaa in Iswiidhan ay horumar ku sii socoto?

U codee xisbiga Moderaterna bisha Sebtembar 13keeda.

” *Dadaalku waa inuu midho dhaliyaa.
Faldembi waa in ciqaab lagu mutaystaa.*

Ulf Kristersson, ra'iisul wasaaraha iyo hoggaamiyaha xisbiga Moderaterna.



Ma rabtaa inaad ku lug yeelato Iswiidhan caddaalad ah?

Maanta xubin ka noqo oo bixi 100 SEK. Iskaan garee QR-koodhka ama booqo: moderaterna.se/medlem

